



## Crisis Payment (Lacag-bixinta Waqtiga Shidada)

Waxaan fahamsanahay inay jiri karaan waqtiyo aad nooga baahan tahay taageero dheeraad ah. Crisis Payment waa lacag-bixin hal-mar ah oo lagu siin karo duruufaha qaarkood.

### Maxaa loo bixiyaa?

Crisis Payment waxaa la bixiyaa markii:

- lagugu qasbay inaad ka tagto gurigaaga aadna samaysanayso, ama aad doonayso inaad samaysato, guri cusub sababtoo ah duruufo aad u adag sida rabshadda qoyska ama musiibo dabiici ah
- aad sii joogto gurigaaga ka-dib markii aad la kulantay rabshad qoys markaas oo xubinta qoyska oo ka masuulka ah ay tagtay ama laga saaray guriga
- lagaa soo-daayey xabsi ama xarunta dhaqan-celinta ka dib markii lagu xiray muddo ugu yaraan ah 14 beri taas oo ka dhalatay in lagugu qaaday dambi, ama
- aad timid Australia markii kowaad oo aad ku soo-gashay fiisada banii-adamka

### Xaq ma u leeyahay?

Si aad ugu xaq yeelato Crisis Payment, waa inaad ku jirtaa dhibaato maaliyadeed oo aad u daran waa inaad samaysaa codsi toddobo beri gudahood marka laga joogo mid ka mid ah xaaladaha soo socda:

- duruuf aad u daran
- xubinta qoyska oo ka masuulka ah inaad la kulanto rabshadda qoyska ay ka tagto, ama laga saaray gurigaaga
- taariikhda lagaa soo daayey xabsiga ama xarunta dhaqan-celinta, ama
- inaad timid Australia markii kowaad oo aad ku soo-gashay fiisada banii-adammimada

waa inaad kaloo qaadataa, ama aad xaq u leedahay inaad qaadata:

- lacagta hawlgabka ama manfaca Centrelink – tana waxaa ku jira lacag-bixinta sida Parenting Payment (Lacag-bixinta Waalidnimada), Newstart Allowance (Lacag-bixinta Shaqo-doonka), Youth Allowance (Gunnada Dhallin-yarada), Disability Support Pension (Lacagta Hawlgabka Taageerada Iinta) iyo Age Pension (Lacagta Hawlgabka Da'da), ama ABSTUDY Living Allowance (Gunnada ABSTUDY).

Uma xaq yeelanaysid Crisis Payment haddii xaquuqdaada aad naga hesha ay keliya tahay Family Tax Benefit payment (Lacag-bixinta Manfaca Canshuurta Qoyska) ama Child Care Subsidy (Lacag-bixinta Kabidda Daryeelka Ilmaha).

### Waa immisa Crisis Payment?

**Xadiga** Crisis Payment wuxuu la mid yahay lacag-bixinta hal asbuuc ee lacagta hawlgabkaaga asaasiga ah ama manfacaaga Centrelink. Taasna kuma jiraan lacag-bixinta sida Rent Assistance (Caawimaadda Kirada) ama Pharmaceutical Allowance (Gunnada Daawooyinka). Lacag-bixintan



waa lacag-bixin hal-mar ah oo ka dheeraad ah lacag-bixintaadaa laba-toddobaadlaha oo joogtada ah.

### **Hardship Advance (Lacagta Horumarinta ee Dhibaataada)**

Ayadoo ka dheeraad ka ah Crisis Payment, waxaad kaloo codsan kartaa in qayb ka mid ah haftada kowaad ee lacagtaada hawlgabka ama manafaca in hore lagu siiyo haddaad u xaq leedahay. Taasna waxaa loo yaqaan Hardship Advance.

### **Wixii macluumaad dheeraad ah**

<b>Adeegyada Shaqo-siinta</b>	<b>132 850</b>
<b>Khadka Australian-ka da'daa</b>	<b>132 300</b>
<b>Iinta iyo Daryeeyaasha Disability and Carers</b>	<b>132 717</b>
<b>Khadka Qoysaska iyo Waalidiinta</b>	<b>136 150</b>
<b>Dhalin-yarada iyo Ardayda</b>	<b>132 490</b>
<b>Wax-weydiimaha TTY*</b>	<b>1800 810 586 waa Lacag-la'aan</b>

\*TTY waxaa loogu talagalay oo keliya dadka dhagoolka ah ama ay hayso dhantaalaan maqal iyo ama hadal. Taleefanka TTY waxaa looga baahday in lagu isticmaalo adeeggan.

Wixii macluumaad luqadaha kale ah ka eeg website-kayaga ah **humanservices.gov.au** waxaadna riixdaa 'Macluumaadka luqaddaada' ama wac adeegyaga taleefanka luqadaha-badan oo ah **131 202\***.

Dulsaarada laga qaado wicitaanada taleefankaaga guriga oo la Waco Wasaaradda lambaradeeda '13' way kala duwantahay hadba ayadoo ku xiran bixiyaha adeegga taleefanka. Wicitaannada laga sameeyo taleefanada dadweynaha ama moobaylada waxaa laga qaadaa qiyaas sare.



# Crisis Payment

We understand there may be times when you need additional support from us. Crisis Payment is a special one-off payment that may be paid to you in certain special circumstances.

## Why is it paid?

Crisis Payment may be paid when you:

- have been forced to leave your home and establish, or intend to establish, a new home because of an extreme circumstance such as domestic violence or a natural disaster
- remain in your home after experiencing domestic violence and the family member responsible has left or been removed from the home
- have been released from prison or a correctional centre after being imprisoned for a period of at least 14 days as a result of being charged with an offence, or
- have arrived in Australia for the first time on a qualifying humanitarian visa.

## Am I eligible?

To be eligible for a Crisis Payment, you must be in severe financial hardship and must make a claim within seven days of one of the following events:

- an extreme circumstance
- the family member responsible for you experiencing domestic violence leaves, or is removed from your home
- the date you were released from prison or correctional centre, or
- your first arrival in Australia on a qualifying humanitarian visa.

You must also be receiving, or be eligible to receive:

- a Centrelink pension or benefit – this includes payments such as Parenting Payment, Newstart Allowance, Youth Allowance, Disability Support Pension and Age Pension, or ABSTUDY Living Allowance.

You will not be eligible for a Crisis Payment if your only entitlement from us is a Family Tax Benefit payment or Child Care Subsidy.

## How much is the Crisis Payment?

The amount of Crisis Payment is equal to one week's payment of your basic Centrelink pension or benefit. This doesn't include additional payments such as Rent Assistance or Pharmaceutical Allowance. This payment is a one-off addition to your regular fortnightly payment.



## Hardship Advance

In addition to Crisis Payment, you may also apply to have part of your first instalment of pension or benefit paid early if eligible. This is called a Hardship Advance.

## For more information

<b>Employment Services</b>	<b>132 850</b>
<b>Older Australians line</b>	<b>132 300</b>
<b>Disability and Carers</b>	<b>132 717</b>
<b>Families and Parents line</b>	<b>136 150</b>
<b>Youth and Students</b>	<b>132 490</b>
<b>TTY* enquiries</b>	<b>Freecall 1800 810 586</b>

\*TTY is only for people who are deaf or have a hearing or speech impairment. A TTY phone is required to use this service.

For information in other languages visit our website at [humanservices.gov.au](http://humanservices.gov.au) and click on 'Information in your language' or call our multilingual phone service on **131 202\***.

Charges for calls from your home phone to the department's '13' numbers vary depending on your telephone service provider. Calls from public and mobile phones are charged at a higher rate.